

## Waa maxay sababta loo baarayo?

Si loo ogado

- Waxa ilmuu karo iyo waxa ku adag
- Caawinta iyo taageerada uu ilmuu u baahan yahay
- In ilmaha garaadkiisu dhimman yahay



## Baaritaanku wuxuu ka kooban yahay



Wadahadal lala yeesho  
ilmaha/qofka dhallinta yar



Dulmarista taariikhdi  
korriinka



Wadahadal lala  
yeesho waalidka



Baaritaan dhakhtareed



Warbixinta xannaanada  
carruurta iyo iskoolka




Tijaabooyin uu qaado  
cilminafsiyaqaan



## Maxaa keena inuu dadka qaar garaadkoodu dhimman yahay?

- Hiddasidayaasha
- Dhaawac
- Jirro
- Sabab aan la aqoon



## Dadku waa kala duwan yihii oo qofba waa si

Qof walba wuxuu leeyahay shakhsiyaddiisa, meelo uu ku fican yahay, meelo uu ku liito iyo baahi




## Korriin

- Carruurta korriinkoodu waa kala duwan yahay – qaar baa dhakhso wax u barta, qaarna wakhti intaas ka badan ayay u baahan yihii
- Way kala duwan yihii adkaanta waxyaalaha ay carruurtu baran karaan



## Heerka dhimmanaanta garaadka

- Dhimmaanta garaadka waxaa loo kala saaraa mid fudud ila amid aad ah
- Baahida caawintu waxay ku xiran tahay heerka dhimmaanta garaadka iyo in qofku qabo cudurro kale ama waxyaalo kale oo ku adag oo dheeri ah



## Ahaanshaha dhallinyaro iyo qof weyn

Dad badan baa su'aalo iska weydiiya mustaqbalka

- waxbarasho
- shaqo
- wakhtiga firaaqada la yahay
- saaxiibbo
- saaxiib/saaxiibad
- madaxbannaani
- dhaqaale
- hoy
- caafimaad
- laysin baabuur
- galmada
- in ilmo la dhalo



## Xaalad waaraysa

- Dhimmanaanta garaadku\* waa xaalad qofku ahaanayo noloshiisa oo dhan
- Jirro ma aha oo sidii hargab kaa bixi mayso
- Dhimmanaanta garaadka waxaa laga yaabaa in aysan korka ka muuqan
- Caawin wanaagsan iyo in qofka wax laysugu dubbarido ayaa muhiim u ah sidii qofku u heli lahaa nolol wanaag iyo firfircooni leh




\*Dib udhac kooriinka/Naafanimada kooriinka



## Waxbarashada

- Laylisyadu waa inay ahaadaan kuwo adkaantoodu dhexdhedaad tahay
- Wakhti dheer u baahan yahay
- Wuxuu si fican wax u bartaa marka uu wax ku celceliyo
- Waxaa u fudud inuu wax u barto hab baraatiko ah



## Fikirid iyo mas'alo xallin

Waxaa ku adkaan kara

- Inuu wixii uu bartay u isticmaalo hab kale ama ku dabakho xaalad kale
- Inuu wax qorsheeyo oo laylis dhammeeyo
- Inuu fahmo waxa uusan arki karin ama taaban karin



- Waxbarasho, fikirid iyo fahmid



## Xawaare

Wuxuu u baahan yahay wakhti dheer si uu u fikiro, u fahmo oo wax u qabto



- Waxbarasho, fikirid iyo fahmid



## Feejignaan


Waxaa ku adkaan kara

- Inuu muddo dheer isla hal laylis ka shaqeyyo
- Inuu dhawr wax isku hal mar ka fikiro
- Inuu dhawr farriimood hal mar wada maqlo



## Luuqad

- Inta badan wakhti dheer buu u baahan yahay si uu wax u yiraahdo
- Ma isticmaalo ereyo badan oo adag
- Jumlado gaagaaban ayuu isticmaalaa
- Way ku adag tahay inuu dadka fahmo markay isticmaalaan jumlado dhaadheer iyo ereyo adag
- Way ku adag tahay inuu dadka fahmo markay isticmaalaan jumlad macne daahsoon leh - sida «qadada in laga boodo»
- Dadka qaar baa u baahan sawirro, in gacmaha lagala hadlo ama habab kale oo laysula hadlo



- Waxbarasho, fikrid iyo fahmid



## La qabsiga bulshada

Waxaa ku adkaan kara

- Inuu ogaado sidii uu ciyarta ugu biiri lahaa oo dadka kale ula ciyaari lahaa
- Inuu fahmo oo barto xeerarka ciyarta
- Inuu Saaxiibbo yeesho oo haysto
- Inuu xad samaysto si aan loo khiyaanin ama looga faa'iidaysan



## Isku filnaasho

Wuxuu u baahan yahay in wax laysugu dubbarido, waana inuu  
wax ku tababbartaa oo ku celceliyaa si uu isku filnaan u gaaro



- La qabsiga bulshada iyo isku filnaanta

**CARRUUR**

Regionsenter for habiliteringstjenesten  
for barn og unge (RHABU)



## Dareenka

Dadka qaar ayay ku adag tahay inay gartaan, sharraxaad  
ka bixiyaan ama xukumaan dareenkooda



Xukumidda dareenka iyo heerka firfircoonda haddii ay qofka ku adkaadaan waxay  
keeni karaan dhibaato xagga habdhaqanka ah iyo/ama dhibaato maskaxiyan ah



## Heerka firfircoonida

Dadka qaar bay ku adag tahay inay miisaamaan oo wax ka beddelaan heerka firfircoonidooda – qaar ayaa aad u firfircoon, qaarna aad bay u deggan yihiiin




Xukumidda dareenka iyo heerka firfircoonida haddii ay qofka ku adkaadaan waxay keeni karaan dhibaato xagga habdhaqanka ah iyo/ama dhibaato maskaxiyan ah



## Waxbarashada


- Laylisyadu waa inay ahaadaan kuwo adkaantoodu dhexdhedaad tahay
- Wakhti dheer u baahan yahay
- Wuxuu si fican wax u bartaa marka uu wax ku celceliyo
- Waxaa u fudud inuu wax u barto hab baraatiko ah



## Fikirid iyo mas'alo xallin


Waxaa ku adkaan kara

- Inuu wixii uu bartay u isticmaalo hab kale ama ku dabakho xaalad kale
- Inuu wax qorsheeyo oo laylis dhammeeyo
- Inuu fahmo waxa uusan arki karin ama taaban karin



## Xawaare

Wuxuu u baahan yahay wakhti dheer si uu u fikiro, u fahmo oo wax u qabto



- Waxbarasho, fikirid iyo fahmid



## Feejignaan

Waxaa ku adkaan kara

- Inuu muddo dheer isla hal laylis ka shaqeyyo
- Inuu dhawr wax isku hal mar ka fikiro
- Inuu dhawr farriimood hal mar wada maqlo



## Luuqad

- Inta badan wakhti dheer buu u baahan yahay si uu wax u yiraahdo
- Ma isticmaalo ereyo badan oo adag
- Jumlado gaagaaban ayuu isticmaalaa
- Way ku adag tahay inuu dadka fahmo markay isticmaalaan jumlado dhaadheer iyo ereyo adag
- Way ku adag tahay inuu dadka fahmo markay isticmaalaan jumlad macne daahsoon leh - sida «qadada in laga boodo»
- Dadka qaar baa u baahan sawirro, in gacmaha lagala hadlo ama habab kale oo laysula hadlo



## La qabsiga bulshada


Waxaa ku adkaan kara

- Inuu fahmo xeerarka bulshada iyo farriimaha uga imaanaya dadka kale
- Inuu saaxiibbo yeesho oo haysto
- Inuu yaqaanno waxa dadka kale lagala hadli karo oo lala wadaagi karo
- Inuu xad samaysto si aan loo khiyaanin ama looga faa'iidaysan



## Isku filnaasho

Wuxuu u baahan yahay in wax laysugu dubbarido, waana inuu  
wax ku tababbartaa oo ku celceliyaa si uu isku filnaan u gaaro



## Dareenka

Dadka qaar ayay ku adag tahay inay gartaan, sharraxaad  
ka bixiyaan ama xukumaan dareenkooda



Xukumidda dareenka iyo heerka firfircoonda haddii ay qofka ku adkaadaan waxay  
keeni karaan dhibaato xagga habdhaqanka ah iyo/ama dhibaato maskaxiyan ah



## Heerka firfircoonida

Dadka qaar bay ku adag tahay inay miisaamaan oo wax ka beddelaan heerka firfircoonidooda – qaar ayaan aad u firfircoon, qaarna aad bay u deggan yihiiin



Xukumidda dareenka iyo heerka firfircoonida haddii ay qofka ku adkaadaan waxay keeni karaan dhibaato xagga habdhaqanka ah iyo/ama dhibaato maskaxiyan ah

